



Hooyga Daryeelka

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

Hooyga Daryeelka

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo

Maxaa loola jeedaa hooyga daryeelka? Hooyga daryeelka (waxaa loogu dhawaaqaa haw-spiss) waa nooc daryeel gaar ah kaasoo ay doortaan qofka iyo qoyskiisa ama kuwa uu jecel yahay. Hooyga daryeelka wuxuu dadka qaba cudur soo kooba nolosha ku kaalmeyaa in ay si wanaagsan iyo sharaf ku noolaadaan bilaha ugu dambeeyo noloshooda. Hooyga daryeelka waa khaas maxaa yeelay wuxuu kaloo kaalmeyaa qoyska qofka iyo bixiyeyaasha daryeelka.

Sidee ayuu hooyga daryeelka noo kaalmeyn karaa Aniga iyo qoyskeyga?

Inta badan qoysaska ma laha ama waxay leeyahiin waayo aragnimo yar ay ku daryeelaan qof ku sugaran dhimasho. Kooxda hooyga daryeelka waxay siyaabo badan ku kaalmeyn kartaa adiga iyo qoyskaada ama kuwa aad jeceshahay. Tusaale ahaan, kooxda hooyga daryeelka waxay bixisaa daryeelka roonaanta si ay u yareyso xanuunka iyo calaamadaha, waxay bixisaa taageerada caatifadda iyo nafsadda, waxay bartaa farsamooyin gaar ah xagga daryeelka, waxay qorsheysaa qalabka loo baahan yahay, iyo waxay ka jawaabtaa su'aalaha laga yaabo in aad adiga iyo qoyskaada qabtaan.

Xaggee ayaan ku heli karaa adeegyada hooyga daryeelka? Meel kasta oo aad ku tilmaantid guri. Tusaale ahaan, guri gaar ah, xarunta nolosha la kaalmeeyo, hay'adda daryeelka muddada dheer, isbitaalka, guriga kooxda, guriga korinta, ama abarman.

Goormaa loo baahan yahay in aan takhtarkeyga kala hadlo hooyga daryeelka? Weydii takhtarkaada iyo qoyskaada kala hadal fursadahaada daryeelka iyo adeegyada, sida hooyga daryeelka, marxaladaha hore uu xanuunka darran yahay kaasoo soo gaabin kaara noloshooda. Adeegyada hooyga daryeelka waxay adiga iyo qoyskaada idin kaalmeyn karaan muddo bilooyin, ma aha oo keliya maalmo.

La xariir MNHPC

Wac (651) 917-4616 ama booqo www.mnhpc.org haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah oo ku saabsan sida loo helo bixiyeyaal ama haddii aad qabtid su'aalo guud oo ku saabsan daryeelka hooygalagu siiyo adiga ama kuwa aad jeceshahay.



Maxaa dhaca haddii aan noolahay keligey ama uusan jirin qoys ii dhaw?

Kooxda hooyga daryeelka waxay kaala hadli kartaa xulashadaada xagga ammaanka iyo roonaanta gurigaada, xataa haddii aad keligaa nooshahay. Adeegyada hooyga daryeelka waxaa kaloo laga heli karaa hay'adaha kalkaalinta guriga ama guryaha daryeelka gobolkaada.

Goormaa ayaan heli karaa hooyga daryeelka? Kooxda hooyga daryeelka waxay adiga iyo qoyskaada kala hadli doontaa inta jeer aad u baahan tahay booqasho joogto ah taasoo kaddibna la qorsheeyo. Kooxda hooyga daryeelka ma bixiso daryeelka 24ta saac, hase ahatee waxay kaalmo ka geysan kartaa qorshaha haddii taasi tahay waxa aad u baahan tahay. Hooyga daryeelka waxaa ka mid ah helitaanka kalkaaliye ku jirta diiwaanka oo la wacan karo 24 saac maalintii, 7 maalin todobaadkii marka lala kulmo xaalado degdeg ah.


Yaa bixiya kharashka daryeelka waayeelka? Adeegyada hooyga daryeelka waxaa bixiya Medicare, Medical Assistance, MinnesotaCare, inta badan shirkadaha ceymiska caafimaadka gaar loo leeyahay, ama adiga ayaa baxsan kara si gaar ah. Waxaa kaloo la heli karaa manaafacaadka la siiyo kuwa ka soo shaqeeyay ciidamada. Barnaamijka hooygaada waayeelka wuxuu la shaqeyaa adiga iyo qoyskaada si aad u heshaan siyaabo loo bixiyo kharashka adeegyada.

Ma dooran karaa in aan joojiyo guriga waayeelka kaddib marka aan isku qoro? Mar kasta, daryeelka waayeelka waa wax aad doorataan adiga iyo qoyskaada. Haddii aad dooneysid in aad soo afjartid adeegyada hooyga daryeelka waqtii kasta, go'aankaas adiga ayaa iska leh. Mar kasta, waxaad leedahay fursad aad ku dooratid in aad dib isugu qortid goor dambe haddii aad weli xaq u leedahay.

Hooyga daryeelka ma siiyaa taageero qoyska kaddib marka bukaanka dhinto? Hooyga daryeelka wuxuu qoyska siiyaa taageerada calool xumada ilaa muddo 13 bil, dhimashada bukaanka kaddib.

**Waxaan xiiso u qabaa in aan in badan ogaproject.
Maxaa ku xiga?**

- La xariir Minnesota Network of Hospice & Palliative Care (651) 917-4616 si aad u codsatid koobi ku saabsan "Xulashada Hooyga daryeelka: Ilaha Hooyga daryeelka macaamilka" bit.ly/1K7XYZ7
- Weydii takhtarkaada. Iisticmaal kaarka boorsada "Maroodiga ku jira Qolka Baarista" ("Elephant in the Exam Room") si uu u hoggaamiyo wada hadalkiina. bit.ly/1nmjAXo
- Weydii takhtarkaada hooyga daryeelka haddii aad qabtid xanuun soo gaabin doono noloshaada. Haddii takhtarka la tahay in aad noolaan doontid in ka yar 6 bil, waxaa dhici karto in uu kuu diro barnaamijka hooyga daryeelka.



Ilaha Hooyga Daryeelka

Minnesota Network of Hospice & Palliative Care

"Xulashada Hooyga daryeelka: Ilaha Hooyga daryeelka macaamilka"
bit.ly/1K7XYZ7

Stratis Health/TRUE Hospice Project

Kaarka boorsada "Maroodiga ku jira Qolka Baarista" ("Elephant in the Exam Room")
bit.ly/1nmjAXo

Minnesota Network of Hospice & Palliative Care

Find a Provider www.mnhpc.org/web-2-0-directory